

Guddiga Maamul Wanaagga Maaliyadda: Hadalqoraalka kulanka oo kooban

Kulanka 57aad ee 13ka Diseembar 2022 – Wasaaradda Maaliyadda

Arrimaha Maaliyadda: Kulanka Guudiga Maamul Wanaaga Maaliyadda waxaa looga hadlay halka ay marayso ansixinta Miisaaniyadda Dowladda Federaalka Soomaaliya (DFS) ee 2023-ka iyo dadaallada ay DFS ku dooneyso in la soo mariyo kaalmada hay'adaha Qaramada Midoobay miisaaniyadda sanadlaha ah ee Dowladda. Kulanka ayaa lagu soo dhaweeyay ansixinta Golaha Wasiirada ee Hindise Sharciyeedka Canshuuraha Dakhliga Kheyraadka La Qoto.

Heshiyada iyo Qandaraasyada Guud: Guddiga Maamul Wanaaga Maaliyadda waxuu Wasaaradda Maaliyadda ugu hambalyeysay daahfurka tartanka raashinka iyo qandaraasyada shidaalka ee laamaha amniga. Guddiga waxaa ka go'an inuu dib u eegis ku sameeyso warbixinnada qiimaynta tartanka.

Agaasimaha Guud ee Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadaha ayaa ka warbixiyay halka uu marayo hanaanka qandaraas bixinta baasaboorka. Kulanka ayaa sidoo kale looga hadlay qandaraasyo kale oo dhowr ah iyo heshiisyo ay ka mid yihiin heshiiska adeega qiimeynta tayada waxyaabaha la soo dhoofiyo iyo habka loo marayo hagaajinta qandaraaska fiisaha.

Bangiga Dhexe iyo Arimaha Dhaqaalaha: Guddoomiyaha Bangiga Dhexe ee Soomaaliya ayaa kulanka uga warbixiyay dhameystirka tarjumaadda labo Hindise Sharciyeed oo muhiim ah, oo ay ka mid yihiin Nidaamka Lacag-bixinta Qaranka iyo Hindise Sharciyeedka Ceymiska, iyo dib u eegista Sharciga Bangiga Dhexe, iyo sidoo kale Sharciga Hay'adaha Maaliyadda. Bangiga Dhexe waxuu sii joogta ah uga shaqeynayaa ku biirinta sharciyadaan talooyinka iyo soo jeedinta daneeyayaash. DFS waxa ay filaysaa in dhawaan ay Golaha Wasiiradu ansixiyaan hindise sharciyeedyadan. Intaa waxaa dheer, Bangiga Dhexe waxuu sii wadaa horumarinta waaxda maaliyadda dib-u-qaabaynta, iyo cusboonaysiinta dhammaan xisaabaadka si waafaqsan nidaamka cusub ee IBAN-ka. Bangiga waxa kale oo uu ka shaqaynayaa habaynta hababka lacag bixinta, iyada uu soo bandhigtay nidaamka qaran ee QR-code.